

BILOWGA MACALIMKA GAARKA AH (TUTOR LEARNING INITIATIVE): MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA, XANNAANEYAYAASHA IYO QOYSASKA

Macluumaadkan waxaan loogu talagalay waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo masuuliyiinta ee kuna saabsan Bilowga Waxbarashada Macalimka gaarka ah (Tutor Learning Initiative), oo ka taageeri doonta ardeyda waxbarashadooda 2021.

Sannad dugsiyeedka 2020 wuxuu ahaa mid aan caadi ahayn oo loolan u leh dugsi kasta oo bulshadeed.

Ardey badan oo reer Victoria ah waxay ku qaataan badi teeramkii 2 -aad iyo 3- aad ee sannadkan iyagoo fogaan wax ku baranaya dugsiyada Victoria iyo bulshooyinkooduna waxay sameeyeen dadaal aad u sareeya si loo bixiyo sii socoshada waxbarida iyo waxbarashada ardeydeena inta wakhtigan lagu jiro.

Inta lagu jiro Teeram 4, dugsiyada Victoria oo dhan waxay xoogga saarayaan taageerida caafimaadka maskaxeed ee ardeyda iyo fiyoobaanta, oo ay weheliso in laga caawiyo ardeydu sidii ay ula qabsan lahaayeen dugsiyada wax ku barashada. Macalimiintu waxay sidoo kale xoogga saarayaan qiimeynta ardeyda waxbarashadooda, ka hadlida farqiga u dhaxeeya waxbarashada shakhsiyeed iyo ogaanshaha ardeydaas u baahan taageero dheeraad ah waxbarashadooda , iyagoo isticmaalaya qiimeyn iyo dusha kala socodka ku saleysan fasalka.

Waxaan ognahay in fogaan wax ku barashada la soo marey ay ardeydu ku kala duwan yihiin. Meesha ardeyda qaarkood ay ku horumareen, ardeyda qaarkood si buuxda ulamay qabsan fogaan wax ku barashada. Ardeydeena badidoodu, waxbarid joogta ah oo tayo sare leh 2021 way ku filnaan doontaa inay ka caawiso horumarka heerka waxbarasho ee laga filayo. Ardeyda qaarkood way ka faa'iidi doonaan taageero waxbarasho oo dheeraad degdeg ah 2021.

Sida laga yaabo inaad ka warqabtid, tan jawaabteeda, Dawlada Victoria waxay maalgelineysaa \$250 milyan Bilowga Waxbarashada Macalimka gaarka ah (Tutor Learning Initiative) si ay awood ugu siiso dugsiyada Victoria oo dhan inay hawlgeliso qiyaastii 4,100 macalim khaas ah 2021 si ay u taageeraan ardeyda uga baahan caawimaad dheeraad ah waxbarashadooda. Dugsiyada ayaa go'aamin doona sida ugu wanaagsan ee bilowgaan loogu dhaqan gelin doono ardeydooda waxayna hubin doonaan in ardeydu ay heli doonaan taageeradaan si yareysa carqaladaha waxbarashada kale iyo waxqabadka dugsiyada.

Iyadoo la hawgelineyo macalimiin dheeraad ah si ay u taageeraan carruurta waxbarasho degdeg ah, macalimiinta fasalka waxay heli doonaan awood ka sii balaaran oo ay ku hubiyaan meesha gaarayaan dhammaan ardeyda kale, in baahida hawlgalkooda iyo fiyoobaantooda la fuliyey, si dhammaan ardeydu ay u helaan taageerada ay u baahan yihiin 2021.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Bilowga Waxbarashada Macalimka gaarka ah (Tutor Learning Initiative), iyo sida loogu dhaqangelin doono ardeyda ugu baahan taageero waxbarasho oo shakhsiyeed dugsiyeena, waxaa la siin doonaa ka hor intaysan ardeydu bilaabin waxbararida gaarka ah 2021.

Inta lagu jiro Teeram 4, dugsiyadu waxay la shaqeyn doonaan ardeyda si ay u fahmaan khibradooda fogaan wax ku barashada iyo ku noqoshada dugsiyada wax ku barashada.

Haddii aad saluugsan tahay ka qaybgalka ilmahaaga ee waxbarashada, markay wax ku baranayaan dugsiga ama la socodka markay dugsiga ku noqdaan fadlan la xiriir dugsigaagal.